
# Kitaabka Quduuska ah ee loogu talo galay Carruurta

Soo-jeedinayaa



# Dhalashadii Kaniisadda

Waxa qoray: Edward Hughes


Waxa Tusaaleeyay: Janie Forest
Alastair Paterson

Waxa dhaqan-geliyay: Ruth Klassen

Waxa tarjumay: Zemendale Translation Service
email: zemendale@gmail.com
Po Box 32155, Addis Ababa, Ethiopia

Waxa soo saaray: Bible for Children
www.M1914.org

©2025 Bible for Children, Inc.
Liisan: Waxaad xaq u leedahay inaad koobiyayso ama daabacato qisadan, in alla inta aanad ka iibinaynin.




Markii Ciise dhintay, xertiisii cabsi baa ku dhacday oo qudhooda wey isqariyeen. Mrkii uu Ciise geerida ka soo sarakacay, wuxuu istusay xertiisii oo isu muujiyey. Ciise wuu noolyahay! Laakinse Ciise waxa u qorshaysnaa inuu ka tago iyaga, oo uu dib ugu laabto samada meeshuu weligiiba kula noolaa Ilaah, Aabbihii.



Intii uusan
ka tagin,
wuxuu kula
ballamay Ciise
xertiisii Isaga
inuu u soo diri doono Quuxa
Qudduuska inuu qalbi qaboojiyo
oo uu gargaaro iyaga (Yooxanaa 15:26). Saacaddu
wey dhowdahay! Maalmo yar ka dib markii Ciise
ka tagay, Ilaaha Ruuxa Qudduuska ah baa yimid.

Sidan bayna u dhacday. Ilaa iyo 120 raacsanayd Ciise oo wadajir u tukanaya guri dhexdiisa ayaa si lama filaan ah, gurigii ka soo buuxsamay sanqadh cod dabayl weyn wata.



Olol dab oo kale sidii carrabo u kala qaybsama ayaa ku dul fadhiistay mid kasta. Kolkaasaa kulligood waxaa ka wada buuxsamay Ruuxa Qudduuska horey siduu Ciise ugu sheegayba.



Wadooyinka dibadda ah, ayay Ciise xertiisii afaf ku hadleen oo aysan weligood horey u baran. Dadkii ajaanibka ahaa ee booqanayay Yersaalem ayaa maqlay xertii waxay ku hadlayeen ee ku saabsanaa shaqadan cajiibka ah ee Ilaah luqadaheeda badan.

Wey yaabeen dadkii. "Tani micneheeda waa maxay?" bay isweyddiiyen. "Kuwani waxaa ku buuxa khamri cusub,"




Qaar kalena way ku qosleen oo ku majaajiloodeen.


Laakiin Butros baa wuxuu yidhi, “Kuwani ma sakhraansana … Waa wixii lagaga dhex hadlay nebi Yoo’eel …” Haddaba Butros wuxuu soo xusuusiyey snado badan ka hor, Ilaah ballantiisii ahayd Ruuxa Qudduuska inuu u iman doono oo barakayn doono oo gargaari doono dadka.



Butros dadkii wuxuu u sheegay waajib ku tahay iney ka soo noqdaan debiyada oo deedna lagu babtiiso magaca Ciise Masiixa. "…Oo waxaad heli doontaan haddiyadaha Ruuxa Qudduuska," Butros baa sidaa ku yidhi. Abbaaraha 3000 qof ayaa aqbalay. Waxayyna ku soo biireen xertii caabudayaashii Ciise. Kolkaa ka dibna, dad badan baa baa ku soo biiray kaniisadda Ilaah bilaabay maalintii Ruuxa Qudduuska yimid.



Ruuxa Qudduuska awood iyo xoog buu u keenay noloshii dadkii Ilaah. Maalin baa, Butros iyo Yooxanaa macbutka tageen wakhtigii salaadda. Niin curyaan ah oo dawarsada oo la ag - dhigi jiray albaabka macbudka. Lacag weyddiistay Butros iyo Yooxanaa.





Deedna Butros ayaa yidhi, "Lacag iyo dahab midna ma haysto, laakiin waxaan heystaan ku siinayaa. Magaca Ciise Masiixa, kii reer Naasaret, ku soco." Markaasuu intuu gacantya midigta ku dhegay ayuu sara kiciyey: oo markiiba cagahihiisii iyo anqowyadiiisiiba waa xoogeysteen, intuu kor u booday ayuu istaagay oo socod bilaabay; markaasuu iyaga macbudka la galay – isagoo socda oo boodboodaya oo Ilaah amaanaya.


Waxaa isu soo baxay dad aad u badan oo la yaabban mucjisada. Butros waxa uu u sheegay in ay ahayd awoodda Ilaah, ee aanay ahayn kiisa, taas oo bogsiisey ninkii curyaanka ahaa.



Markii Butros uu Yuhuuddii xusuusiyey in Ilaah Ciise ka sara kiciyey kuwii dhintay, hoggaamiyayaashii macbudka ayaa si cadho leh u qabtay Butros iyo Yooxanaa oo xabsi ku riday. Si kastaba ha ahaatee, ilaa 5000 oo nin ayaa rumaystay Ciise.



Maalintii xigtay, Butros iyo Yooxanaa ooh or taagan sirkaalkii taliyaha macbudka. “Xooggee ama magacee baad waxan ku samayseen?” Taliyayaashii baa weyddiiyey.



Ruuxa Qudduuska oo ka buuxa, ayuu Butros ugu jawaabay si dhiiranaan ku jirto, " .. magaca Ciise Masiix, kii reer Naasaret, oo aad iskutallaabta ku qodobteen, oo Ilaah ka soo sarakicyey kuwii dhintay, daraadiis ninkanu isagoo bogsaday halkan hortiina ku taagan yahay."



Butros wuxuu sii watay cabsi la'aan, "...ma jiro magac kale samada hoostiisa oo dadka dhexdooda loo bixiyey oo ay waajib nagu tahay inaynu ku badbaadno." Iyaga oo aan doonayn in dadku rumaystaan Ciise, taliyayaashii aad bay ugu hanjabeen Butros iyo Yooxanaa. "Laga bilaabo hadda waa inaadan ninna kula hadlin magaca Ciise."




Butros mar buu ka cabsaday inuu garab istaago Ciise. Laakiin waxay ahayd intuusan Ruuxa Qudduuska iman. Iminka cidna ma cabsin karto isaga. Butros iyo Yooxanaa waxay ku jawaabeen, “Idinku kala xukuma inay Ilaah hortiisa ku quman tahay inaannu idinka idin maqalno intaannu Ilaah maqli lahayn, iyo inkale.”



Ka dib
markii aad
loo cabsiiyey,
taliyayaashii sii
daayeen Butros
iyo Yooxanaa.
Adeegayaaha
dhiiran ee Ilaah
waxay u sheegeen
dadkoodii dhamaan
wixii ku saabsanaa
ee ka dhacay xabsigii
iyo maxkamadii.



Dabadeed waxay isugu yimaadeen kulan salaad weyn iyo amaan Ilaah ah. Mar kale, ayaa Ruuxa Qudduuska ee Ilaah ka buuxsamay dadkiisii oo xoog u yeelay – oo sidaa bay ku sii kortay oo kortay kaniisaddii yareyd (Sabida ahayd).



Dhalashadii Kaniisadda

Qiso ka ahaaatay Ereyga Ilaah,
Kitaabka Quduuska ah,

waxa laga helayaa

Falimaha Rasuullada 1-4

“Erayadaada furniinkoodu wax buu iftiimiyaa.” Sabuurka 119:130

# Dhammaad

55

60

Qisadan ku xusan Kitaabka Quduuska ahi waxay inoo sheegaysaa wax ku saabsan Ilaaheenna cajiibka ah ee ina sameeyay isla markaasna kaa raba inaad isaga ogaato.

Ilaah wuxuu ogsoonyahay inaan samaynay waxyaalo xunxun, kuwaas oo uu Ilaah ku magacaabo denmbi. Ciqaabka denbiguna waxa weeyi dhimasho, laakiinse Ilaah aad ayuu kuu jecelyahay waxaanu kuusoo diray Wiilkiisa madiga ah oo ah Ciise, si uu ugu dhinto iskutallaabta korkeeda una maro ciqaabka denbigaaga. Kaddib Ciise dib ayuu usoo noolaaday isagoo aaday Samada! Haddii aad Ciise rumaysantahay oo aad weydiisato inuu kaa cafiyo denbiyadaada, waa uu kaa dhaafi doonaa! Waa uu iman doonaa isagoo adiga kugu dhex noolaan doona, oo adiguna isaga ayaad weligaa la noolaan doontaa.

Haddii aad rumaysantahay in middani ay run tahay, sidan ku dheh Ilaah: Qaaligaygii Ciisow, waxaan rumaysanahay inaad tahay Ilaah, iyo inaad noqotay aadane si aad uugu dhimato denbiyadayda, oo imikana dib ayaad u noolaatay. Fadlan noloshayda soo gal oo cafi denbiyadayda, si aan markaas imika u helo nolol cusub, oo maalin maalmaha ka mid ahna aan adiga kuula jiro abid. Igu caawi inaan ku addeeco oo aan u noolaado sidii anigoo ah ilmahaaga. Aamiin.

Akhri Kitaabka Quduuska ah oo maalin walba la hadal Ilaah!
Yooxanaa 3:16